

Isdiwaangelinta si aad u coddeyso

Waxaad isu-diiwaangelin kartaa inaad ka coddeyso Michigan haddii:

Aad tahay muwaadin Mareykan ah

- Aad deganayd Michigan ugu yaraan 30 maalmood
- Qofka jiraa 17.5 ilaa iyo 18 jir marka la gaaro Maalinta Doorashada si oo u codeeyo (dadka u qalma waa 16 iyo 17 sano jir way isdiwaangelin karaan xilli hore si ay u codeeyaan)
- Aanad hadda ku jirin xukun xabsi ama jeel a

Iska diiwaangeli onlayn barta Michigan.gov/Vote ama daabac foomka isdiwaangelinta codbixiyaha ee la turjumay ee laga heli karo halkan Michigan.gov/SOSLanguageForms.

U codee qaabka aad jeceshay: Ikhtiyaaradaada codbixinta ee Michigan


- **Ku codee boostada:** Codso warqadda codbixinta ee qofka maqan in boostada laguugu soo diro gurigaaga si ay kuugu fududaato coddeyntu. Ka codso warqada coddeynta ee qofka maqan onlayn barta Michigan.gov/Vote ama soo dejiso arjiga la turjumay ee laga heli karo halkan Michigan.gov/SOSLanguageForms.
- **Hore ugu codee si shakhsi ah:** Booqo goobta codbixinta hore ee kuugu dhow si aad hore ugu coddeyso si shakhsi ah. Codbixinta hore ee Noofambar waxay ka bilaabmaysaa gobolka oo dhan Oktoobar 26 waxaanay soconaysaa ilaa Noofambar 3.
- **Codee Maalinta Doorashada:** Booqo goobta codbixinta ee kuugu dhow si aad codkaaga u dhiibato Maalinta Doorashada.
- **Turjumida goobta codbixinta:** Waxaad xaq u leedahay inaad soo kaxeysato turjumaan ku caawiya marka aad coddeynayso. Turjumaankaagu saameyn kuma yeelan karo codkaaga, ma noqon karo loo-shaqeeyahaaga, wakiilka loo-shaqeeyahaaga, ama sarkaal ama wakiil ka tirsan ururkaaga shaqaalaha.
- **Looma baahna wax aqoonsi ah oo sawir leh:** Haddii aanad haysan aqoonsi sawir leh, weli waad dhiiban kartaa codkaaga.
- **Muwaadiniinta soo laabtay:** Gobolka Michigan, muwaadiniinta soo laabtay, ee dembiyo horay u galay, wali waxay xaq u leeyihiin inay isdiwaangeliyaan oo ay codeeyaan, xitaa haddii ay ku jiraan siidaynta tijaabada ama la socoshada ah.

Xuquuqa- haagacodbixinta ee gobolka Michigan

Haddii aad la kulanto wax dhibaato ah Maalinta Doorashada ama ka hor, ama haddii aad wax su'aalo ah ka qabto codbixinta, la xiriir Khadka Difaaca Doorashada si aad u hesho kaalmo:

- 866-OUR-VOTE (866-687-8683)

Ogow wax badan oo ku saabsan cod ka dhiibashada Michigan oo ku qoran Soomaali Mi.gov/SOSLanguage ama sawir koodhka QR.



Difaaca doorahada iyo cabsi galinta codbixiyaha